RCoA
Royal College of Anaesthetists

# Suuxdin – khataraha iyo saamaynta xun

# Dhaawaca ilkaha, dibnaha/bishimaha iyo carrabka

## Ku saabsan warqadaan

Buug-yarahani waxa uu ku saabsan yahay dhaawaca ilkahaaga, dibnahaaga/bushimahaaga iyo carrabkaaga taas oo dhici karta haddii lagugu sameeyo suuxdinta guud. Waxay sharxaysaa sida dhaawacani u dhici karo iyo waxa laga qaban karo.

Suuxdinta guud waa dawooyin keena hurdo qoto dheer oo la mid ah mida dhabta ah. Waxay muhiim u tahay qalliinnada iyo niddaamyada qaar. Inta lagu jiro suuxdinta guud, waad miyir la'dahay oo waxba ma dareemaysid.

Waxaad website-keena ka akhrisan kartaa noocyada kala duwan ee suuxdinta, kuwaas oo looga heli karo luuqado kala duwan halkan:www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages.

## Wax ku saabsan dhaawaca ilkaha, dibnaha iyo carabka inta lagu jiro daawada suuxinta

Afkaaga iyo bushimahaaga mararka qaarkood waxay yeelan karaan jeexitaano yaryar ama nabar ka dib suuxdinta. Kuwaas badanaa waxay ku bogsadaan dhowr maalmood.

Ilkaha waa la jajabin karaa, dabacsanaan karaa ama mararka qaarkood waxay ku soo bixi karaan shil inta lagu jiro suuxdinta guud.

Inta lagu gudo jiro suuxdinta guud, murqaha jirkaaga waa ay dabcaan, oo ay ku jiraan murqaha dhuunta iyo kuwa xabadka. Tani waxay yarayn kartaa xadiga hawada ee gasha sambabadaada.

Si loo hubiyo in ogsijiintu si joogto ah ugu socoto sambabadaada, dhakhtarka suuxinta wuxuu galin karaa tuubo neefsasho dhuuntaada si hawo/neef qaadashadu kuugu sii furnaato/socoto. Badanaa waxay tan sameeyaan ka dib markaad miyir beeshid.


Tuubooyinka ama maaskarada uu dhakhtarka suuxdinta isticmaalo inta aad miyir la'dahay waxay si lama filaan ah udhaawaci karaan ilkahaaga, dibnahaaga iyo carrabkaaga. Qalabkani waa u lagama maarmaan badbaadaada inta lagu guda jiro suuxdinta.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan marin-haweedkaaga iyo neefsashadaada xilliga suuxinta ka heli kartaa website-keena kaas oo looga heli karo luuqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

## Waa sidee suurtagalnimada ay ku dhici karto?

### Gooyn yar ama nabar ku dhaca bushimaha iyo carrabka

**Laga soo qaaday 100 qof ee kasta**



**1 ilaa 5** ayaa dhaawacmay

**95 ilaa 99-na** ma dhaawacmin

### Dhaawac soo gaaray ilkaha una baahday dhakhtarka ilkaha

**Laga soo qaaday 10,000 ee qof ee kasta**

| | |
|---|---|
| **5 ayaa dhaawac dhakhtarka ilkaha ubaahday soo gaaray** | **9,995-na dhaawac ma soo gaarin** |

In ka badan kala badh dadka ay waxyeelladu ilkaha kasoo gaartay ayaa lahaa ilko iyo cirrid kuwaasoo ku sugnaa xaalad xun qalliinka ka hor.

Lamabaradaani waxay ka imaadeen cilmi baarisyo. Waxaad website-keena ka eegi kartaa halka aan ka soo xiganay lambaradeena: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/evidence

## Ma jiraan wax sii kordhin kara suurtagalnimada arrintan?

Suurtagalnimada dhaawacu way badan tahay haddii:

- aadan afkaaga ukala qaadi karin si aad u ballaaran ama aadan si fudud qoortaada u dhaqaajin karin. Tusaale ahaan qaar ka mid ah xaaladaha arthritis-ku(cudurada kalagoysyada) waxay adkeyn karaan inaad dhaqaajiso qoorta ama aad meelayso madaxaaga inta lagu guda jiro suuxdinta guud
- aad leedahay ilko sare oo si weyn usoo taagan ama qal/daan yar oo hoose
- aad ugu baahan tahay suuxdin guud si degdeg ah
- aad u baahan tahay qalliin dhalmo oo degdeg ah iyo suuxdin guud
- aad cayilan tahay ama baruur badan luqunta ku leedahay

- lagaa qalayo afka, qoorta, daanka ama cunta mareenka (oesophagus).

## Maxaa kaa caawin kara in laga hortago?

Waxaa jira waxyaabo aad adigu samayn karto si aad u yarayso halista dhaawaca ilkahaaga qalliinka ka hor.

Haddii aad leedahay ilko dabacsan ama cirridku ku xanuunayo ama uu dhiigayo markaad cadaydo, waa inaad u tagtaa dhakhtarkaaga ilkaha isla marka aad ogaato inaad u baahan tahay qaliin.

U sheeg dhakhtarkaaga suuxdinta haddii:

- aad leedahay ilko dabacsan ama dhibaato kale oo ilkahaaga iyo ciridkaaga ah
- aad xiran tahay biraha ilkaha ee la saari karo ama laastikada ilkaha
- Haddii aad leedahay biraha loo xirto ilko la'aanta, likaha qaar aad buuxsatay, ilkaha qaar kaa maqan yihiin, ilko cadays aad xiran tahay ama aad leedahay ilko been ah
- aad mudatay carabka iyo bishimaha.

Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga suuxdinta haddii aad horey u gashay suuxdin guud oo:

- laguu sheegay inay adagtahay in tuubo la geliyo hawo mareenkaaga
- dhaawac ilkaha kaasoo gaaray.

Mararka qaarkood dhakhtarkaaga suuxdinta wuxuu hubin karaa diiwaannadaada caafimaadka si uu u fahmo waxa sababay dhibaatooyinka uuna uga fogaado in uu mar kale waxyeello keeno.

## Maxaa dhacaya haddii ilkahaygu dhaawacmaan?

Dhakhtarkaaga suuxdinta ayaa ku ogeysiin doona haddii waxyeello kusoo gaartay intii qalliinka lagu jiray. Haddii ilkaha qaar kaa soo dataan, way kuu soo celin doonaan. Waxay ku siin doonaan xanuun baabi'iye haddii aad u baahato waxayna kugula talinayaan waxaad samayn lahayd.

Isbitaalada qaar ayaa leh dhakhaatiirta qaliinka ilkaha kuwaas oo eegi doona burburka kuuna hagaajin doona. Haddii tan la waayo, waxaad booqan kartaa dhakhtarkaaga ilkaha ka dibna waxaad kharashka ka dalban kartaa isbitaalka. Waa inaad ka hubisaa cisbitaalkaaga siyaasaddooda ku saabsan dhaawaca ilkaha inta lagu jiro qaliinka oo aad codsato foom aad dib ugu dalbato kharashka.

Haddi dhakhtarka suuxdinta uu dhib kala kulmo inuu tuubo dhuuntaada geliyo ama ilkahaaga ay dhaawacmaan, weydiiso warbixin qoran oo ku saabsan wixii dhacay. Tani waxay noqon kartaa macluumaad badbaadin kara noloshaada haddii aad u baahan tahay suuxin kale mustaqbalka.

Ururka Difficult Airway Society ayaa maamusha nidaamka Kaarka Digniinaha Hawo mareenka. Dhakhtarkaaga suuxdinta ayaa kuu gudbin kara nidaamka. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa lifaaqan: https://das.uk.com/dar.

## Afeef

Waxaan aad isugu daynaa in aan macluumaadka ku jira buug yarahaan ka dhigno mid sax ah oo cusub, laakiin taas ma dammaanad qaadi karno. Ma fileyno in macluumaadkaan guud ay dabooli doonto dhammaan su'aalaha laga yaabo inaad qabto ama aad wax uga qabato wax kasta oo muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadashaa doorashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad qabto kooxdaada caafimaadka, adigoo u isticmaalaya buug yarahaan hage ahaan. Buuggan yar oo keligiis ah waa inaan loola qaadan sidii talo. Looma isticmaali karo ujeeddo iib ama ganacsi. Afeef dhamaystiran, fadlan fiiri: [www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali].

Dhammaan turjumaadaha waxaa bixiyay bulshada turjubaanada ee Translators without Borders. Tayada turjumaadahaan waxaa loo hubiyaa si ay u noqdaan kuwa ugu saxan ee suurtagal ah, balse waxaa jirta suurtagalnimo khaladaad iyo fasiraad khaldan oo ku jira qaar ka mid ah macluumaadka.

# Noo sheeg maxay kula tahay

Waxaan ku soo dhawaynaynaa talooyinka lagu hagaajinayo buug-yarahanta.

Haddii aad haysid wax faalin ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

**Royal College of Anaesthetists**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG

# www.rcoa.ac.uk

Sixth Edition, November 2024

Buug yarahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

**© 2024 Royal College of Anaesthetists**
Buug yarahan waxaa lagu nuqulan karaa ujeedada soo saarista agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa mahadnaq ku habboon waxaana laga saarayaa calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.